

Waxbarista u diyaarinta ah ee waxbarasho-horraadka

Helsinki

Waa maxay waxbarista u diyaarinta ah ee ku socota da'da waxbarasho-horraadka

Waxbarista u diyaarinta ah waxaa loogu talo galay carruurta 6-17 sano da'doodu u dhaxayso ee aanan wali in ku filan aqoonin af-finishka si ay ugu dhigtaan waxbarashada asaasiga ah. Waxbaristu waxaay ku sallaysantahay qorshe waxbarasho oo gaar u ah u diyaarinta waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarista diyaarinta ah waxaa loo hirgaliyaa qaabab kala duwan.

Da'da waxbarasho-horraadka ku jirta waxaa waxbarista la siiyaa iyada oo qayb ka ah waxbarasho-horraadka kale. Waxbarasho-horraadka caadiga ah waxaa la siiyaa 20 saacadood todobaadkii. Waxbarista u diyaarinta ahna waxaa la siiyaa 24 saacadood todobaadkii. Sababtaas darteed ayaay waxbaristoodu uga yara badantahay ardayda waxbarista u diyaarinta ah qaadanaya kuwa kale. Iskugeyn waa afar maalmood todobaadkii oo afar saacadood oo waxbaris ah iyo hal maalin oo shan saacadood oo waxbaris ah.

Waxbarista u diyaarinta ah waa bilaa lacag. Taas waxaa dheer in uu ilmuhu kooxda xanaanada ee caadiga ah ku jiri karo kolba sida uu goysku ugu baahanyahay. Saacadaha xaanaanada lacag ayaa laga bixiyaa.

Hiigsiyada

Marka waxbarista u diyaarintu ay bilaabmayso waxaa ilmaha loo samaynayaa qorshe u gaar ah oo luqadda finishka loogu dhigayo. Qorshaha waxaa wadajir loola samaynayaa waalidka.

Hiigsiga guud ee waxbarista u diyaarinta ah waxaa weeyaan in ardayga la siiyo awooda luqadda iyo waxbarasha iskoolka ee uu ugu baahanyahay si uu ugu wareego waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarista u diyaarintu waxaay sidoo kale horumarinaysaa ardayda korriinkooda isku dheelitiran iyo ka qaybgalkooda mushtamaca finishka ah.

Dhanka fahanka hadalka waxaa la hiigsanayaa in la fahmo

- eraybixinadda iyo hagitaanadda waxqabadka badanaa loo isticmaalo
- su'aalaha caadiga ah ee (maxay, halkee)
- eraybixinadda fudud iyo tusaale ahaan waxyaabaha lid isku ah ama waxyaabaha la is barbardhigayo
- qoraalka fudud ee hadal ahaan loo sheegay

Soosaaridda hadalka hadafyada laga leeyahay waxaa weeyaan in

- uu sheegan karo baahidiisa guud
- uu isticmaali karo wadadhaqanka dadka eraybixinadda iyo weedhaha loo isticmaalo ee gaagaaban ee xaaladaha kala duwan ku habboon.

- iskii inuu u soo saari karo su'aalo iyo in uu ka jawaabi karo.

Muddada waxbarasho-horraadka waxaa la toobabaranayaa akhriska iyo qoraa-lka awoodaha ka horeeya ee u fududaynaya sida, qoraalada kala duwan kala garashadooda, garashada tirada, isku geynta xarfaha iyo ku dhawaaqooda iyo dhanka luqadda finishka laga akhriyo qoraalka. Hadafka waxbarasho-horraadku ma aha in ilmuhu uu barto akhriska ama qoraalka.

Afka hooyo

Waxbarista u diyaarinta ah ee waxbarasho-horraadka waxaa fiiro gaar ah loo yeelanayaa ilmaha luqaddiisa hooyo inay kobacdo waana lagu garabsiinayaa. Si loogu garabsiiyo kobaca luqadiisa hooyo waxaa lagala sheekaysanayaa waalidka tusaale ahaan qaababka ay ku caawin karaan ilmaha in luqadiisa hooyo guriga loogaga taageero iyo qaabka loogaga taageeri karo waxbarasho-horraadka

Qiimeynta

Qiimeyntu waxaay ku sallaysantahay hiigsiyada. Qiimeynta waxaa lagu samaynayaa isla barnaamijka waxbarashada ee ilmaha loo sameeyay markii loo bilaabayay waxbarista u diyaarinta Waxaa lagu qiimeynayaa barashada luqadda ee ilmaha iyo nidaamyada waxbarista loo isticmaalayo.